

IIB MA GALO

FAAFIN

RASMI AH

الرسمية



الجريدة

EE JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

Sannadka 15aad

Muqdisho, 1 Jan. 1987

Lr. 1

Laanta Faafinta Rasmiga ee Madaxtooyada Jamhuuriyadda D. Soomaaliya

FAAFIN BIL SOO BAXA

جريدة شهرية

JIIMUHU: waa 5 shilin lambar waliba — **RUKUNKA:** Sanadii waa Sh. 100 Soomaaliya gudaheeda - dibaddeedana waa Shs. 300. Rukunka ta weydiisto wuxuu ka bilaabmaa 1 Jannaayo. Qiimaha oritaanku F.R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 Sh. — Rukunka iyo qoritaanku waxa la eydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska anshuuraha ee Wasaaradda Lacagta.

K O B N I I N

QAYBTA KOWAAD

Sharci L. 1 ee 3 Dis. 1986, Sharciga Machadka Diblomaasiyadda iyo Tababarrada 2—10

Sharci L. 2 ee 17 Dis. 1986, Oggolaansho Heshiiska JDS iyo J. Dalka Shiinaha, kuna saabsan Iskaashi Dhaqaale iyo F/mo. 11

Sharci L. 3 ee 15 Dis. 1986, U rogid Sharci , Xeerka Sharci 3 ee 5.10.1986, dib u habeynta Qaanuunka kala wareejinta Hantida Maguurtada ah 12—13

WAKAALADDA MADBACADDA QARANKA

Xeer Madaxweynaha J.D.S. Lambr 8 taariikh 20 Jan. 1987 Ujeedo Magacaabid Nootaayo.—

MADAXWEYNAHA J.D.S.

MARKUU ARKAY: Qodobka 82aad ee Dastuurka.

MARKUU ARKAY: Sharciga lambar 8 ee 15.2.61 iyo sharci ga lamabar 1 ee 2.3.62, kuna saabsan habeynta hawlaha Nootaayada.

MARKUU ARKAY: Qodobka 2aad, sharciga lambar 7 ee 2.2.86, oo awood u siinaya Madaxweynaha J.D.S. in uu toos iyo tartan jaaan u magacaabo nootaayo qofkii mudan

MARKUU TIXGELIYEY: In J/le Jaamac Maxamed Qaalib uu si iican u naan karo, xag aqoon sharci iyo xag qalsoonba, minnaada nootaayanimada.

MARKUU TIXGELIYEY: Soo jeedinta Wasaaradda Garsoorka iyo Arrimaha Dinta (Warqad lam. MG/4/23.360 ee 4.3.86)

WUXUU SOO SAARAYAA

Qodobka 1aad

Waxaa J/le Jaamac Maxamed Qaalib loo magacaabay NOOTAAYO, wuxuuna hawlihisa ka fulinayaa, xafiiska ka furanayaa magaalada Muqdisho.

Qodobka 2aad

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa isla marka uu saxiixo Madaxweynaha J.D.S. Waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 20 Jan. 1987.

Waan Aragnay ee Diiwaangelinnay.

Diiwaanka L. 1 Bog. L. 25

da oo ah maaddo maaddo iyo fasal fasal.

Muqdisho, 11.2.87.

Hantidhowraha Guud.

Dr. Xuseen Cabdulle Cali.

Xeer Madaxweynaha JDS L. 13 ee 14 Abriile 1987

MAGACAABID NOOTAAYO

MADAXWEYNAHA JDS

- Isagoo Arkay:** Dastuurka JDS, Qodobkiisa 82aad;
- Isagoo Arkay:** Sharciga Lr. 8 ee 15.2.61 iyo Lr. 1 ee 2.3.1962, oo ku saabsan habaynta hawlaha Nootaayada.
- Isagoo Arkay:** Sharciga Lr. 7 ee 2.2.86 ee ku saabsan Mihnadda Nootaayada.
- Isagoo Tixgelinaya:** Talada uu soo jeediyey Wasiirka Wasaaradda Garsoorka iyo Arrimaha Diinta.

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka soo socda:

Qod. 1aad

Ayadoo la tixgelinayo Qodobka 2aad ee Sharci Lr. 7 ee soo baxay 2.2.1986, laga bilaabo taariikhda uu dhaqan galo Xeerkan Jaallayaasha magacyadooda hoos ku qoran yihiin waxaa lagu magacaabayaa Nootaayo:

1. Dr. Cabdulqaadir Maxamed Jaamac (Muqdisho)
2. Dr. Maxamuud Cali Maxamed (Kismaayo)
3. Dr. Cabdi Cusmaan Saciid (Muqdisho)
4. Jaalle Maxamed Cabdi Kaahin (Hargeysa)

Qod. 2aad

Xeerkan wuxuu dhaqan gelayaa markuu saxiixo Madaxweynaha JDS, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 14 Abriile 1987.

**Waan aragnay ee diiwaangelinnay
diiwaanka Lr. 1 bogga Lr. 40aad
Muqdisho, 16 Abriile 1987,
Hantidhawraha Guud
Dr. Xasan Cabdulle Cali
Madaxweynaha JDS**

— 368/ bis

QAYBTA LABAAD

X E E R

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 21 ee 30

Maaajo 1987 Magacaabid Nootaayo

MADAXWEYNAHA J.D.S.

ISAGOO ARKAY : Dastuurka JDS, Qodobkiisa 82aad.

ISAGOO ARKAY : Sharciga Lr. 8 ee 15.2.61 iyo Lr. 1 ee 2.3.62 oo ku wada saabsan habeynta hawlaha Nootaayada.

ISAGOO ARKAY : Sharciga Lr. 7 ee 2.2.86 ee ku saabsan Mihnadda Nootaayada.

ISAGOO TIXGELINAYA : Talada uu soo jeediyey Wasaarada Garsoorka iyo A. Diinta.

XEERKA soo socda :

Qod. 1aad

Ayadoo la tixgelinayo Qodobka 2aad ee Sharciga Lr. 7 ee soo baxay 2.2.1986 laga bilaabo taariikhda uu dhaqan galo Xeerkan Jaallaha magaciisa hoos ku qoran waxaa lagu magacaabayaa Nootaayo:

Dr. Cabdi Colaad Xiireey. (Muqdisho)

Qodobka 2aad

Xeeka wuxuu dhaqan galayaa markuu saxiixo Madaxweynaha JDS, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiiga ah ee Dawladda.

Waan aragnay ee diiwaangelinay,

Diiwaanka L. 4 bog L. 42,

Muqdisho 1 Jun 1987

Hantidhowraha Guud,

Dr. Xuseen Cabdulle Cali,

Muqdisho 30 Maaajo 1987

MADAXWEYNAHA JDS